


Kaydso Biyaha Degdegga ah ee Masiibooyinka



Qof waliba




Maalin waliba

=



Muddo 3 Maalmood ah



6-dii biloodba



Faaruqi oo Dib u Buuxi

HA isticmaalin



si loogu kaydiyo biyaha



City of Seattle

Seattle
Emergency Management

Seattle Office of Emergency Management
www.seattle.gov/emergency
206-233-5076

Seattle
Public
Utilities

Kaydso Biyaha Degdegga ah ee Masiibooyinka

Masiibooyinka sida dhul gariirka, waxay dhibaateyn karaan nidaamka biyaha. Waa in aad kaydiso biyo ku filan qof walba reerkaaga ka tirsan ugu yaran 3 maalmood.

Sida loo kaydiyo Kaydka Biyaha Degdegga ah

Dhalooyinka 2-da litar ah ayaa ugu fiican in biyo lagu kaydiyo, haddii aad raacdo tilmaamaha soo socda.

- ★ Waxaad hubisaa in ay biyaha nadiif yihiin. Waxaad dhalada ku shubtaa 1/8 qayb qaado oo warakiino ah iyo 2 koob oo biyo ah. Furka ku xir dhalada kaddibna aayar u rux. Waxaad hubisaa in aad dhaqdo hareeraha uu furka ku xirmo ee dhalada.
- ★ Faaruqi dhalada kaddibna waxaad ka buuxisaa biyo cusub, illaa halka ugu sarreysa ee dhalada. Afka hore si fiican u xir waxaadna dhalada ku calaameysaa biyaha cabitaanka degdegga ah. Waxaad calaamadda ku dul qortaa taariikhda aad biyaha ku shubtay.
- ★ Waxaad keydisaa intii biyo ee suuragal ah! Waxaa lagu taliyaa in la kaydiyo **lix dhalo oo laba litar ah qofkii** reerka ka tirsan.
- ★ Faaruqi oo dib u buuxi dhalooyinka 6-dii biloodba mar. (Marka aad beddelayso saacadda xilliyada gu'ga iyo dayrta ayaa ah waqti fiican la faaruqiyo oo dib loo buuxiyo dhalooyinkaaga biyaha.)

DIGNIIN: Ha isticmaalin **dhalooyinka miraayadda ka sameysan** (si fudud ayeey ku jabaan), dhalooyinka caagga caanaha (waa ay adag tahay in la xiro si fudud ayeey ku jabaan) ama **dhalooyinka lahaa warakiinada** ama **kiimikada kale ee lagu sumoobo.**

